

## Nala Soo Xariir

### Taleefoon

206-296-VOTE (8683)

1-800-325-6165

Adeega qoraalka taleefanka  
dhagoolaha (TTY) 711

### limeel

elections@kingcounty.gov

### Oonleen

kingcounty.gov/elections

## Naga soo booqo baraha bulshada

 [twitter.com/kcelections](https://twitter.com/kcelections)


 [facebook.com/kcelections](https://facebook.com/kcelections)

 [instagram.com/kcelections](https://instagram.com/kcelections)

## Boosto ahaan ama toos shaqsi ahaan

Xarunta Dhexe ee Doorashooyinka  
919 Southwest Grady Way  
Renton, WA 98057

Waxay furan tahay maalmaha asbuuca  
8:30 a.m. – 4:30 p.m.



## Coddeynta Laheli Karo

Xarumaha codbixinta waxa ay siiyaan aalado caawin u leh dadka ay ku adag tahay dhammeystirida waraaqaha codbixinta ee boostada lagu soo diray. Haddii ay wax dhibaato ah kaasoo wajahayso inaad dhiibato codkaada, fadlan nagala soo xariir 206-296-VOTE (8683)

## Agabyada codeynta ee luuqadaha kale ah

Marka laga soo tago Af-Ingiriisiga, King County Elections waxa ay ku bixiyaan waraaqaha codbixinta iyo dhammaan agabyada codbixinta luuqadaha Shiineeska, Kuuriyaanka, Isbaanishka, iyo Fiitnaamiis.

Nala soo xariir si aad u codsato agabyada codeynta mid kamid ah luuqadahaas.

**vote!**

# Hagaha Codbixinta Gudaha King County



## Yaa isu diiwaangelin karo inuu codeeyo

Waa inaad ahaataa muwaadin, si sharci ah ku daggan Gobolka Washington, ugu yaraan lix iyo toban sano jir ah, aysan codeynta ka joojin amar maxkamadeed, oo aanan hadda xabsi ugu jirin dambiyo culus oo lagu xukumay darteed.

16- iyo 17-sano-jirada waa ay isa sii diiwaangelin karaan si ay u codeeyaan waxa ayna si otomaatig ah uheli doonaan waraaqahooda codbixinta marki ay uqalmaan/xaq uyeeshaan inay codeeyaan.

NEW

Laga bilaabo Janaayo 2022, xuquuqda codeynta ayaa dib loogu soocelinayaa isla marka lasoo daayo kadib marki dambiyo culus lagu xukumay - ayadoo aanan loo eegeynin heerka kormeerida bulshada. Kuwa horay dambiyo culus loogu xukumay waxa ay isu diiwaangelin karaan inay codeeyaan kadib marka lasoo daayo.

NEW

17-sano-jirada kuwaas oo jirsanaayo 18 sano kahor doorashada guud waxa ay codkooda dhiiban karaan doorashada hordhaca ah. Haddii horay loo sii diiwaangeliyey, 17-sano-jirada uqalma waxa ay si otomaatig ah u heli doonaan waraaqahooda codbixinta doorashada ugu horreyso ee ay uqalmaan inay codeeyaan.

## Hel warqadaada codbixinta

Marki laguuu diiwaangeliyo inaad coddeyso, waxaan warqadaada codbixinta kuugu soodiri doonaa ciwaankaada boostada saddex asbuuc kahor doorashada xigta, kahor ciidamada iyo cod bixiyaasha dibada joogo.

## Baro waxa ku qoran warqadaada codbixinta

Doorasho kasta kahor, waxaa sidoo kale heli doontaa buuga yarka ee codbixiyaasha oo ay kujiraan bayaanka iyo meelaha lagala xariiraayo musharixiinta iyo xog dheeraad ah oo kusaabsan tallaabooyinka codbixinta.

Waxaad sidoo kale heli doontaa hagaha codbixiyaasha gaarka ah kaas oo soo bandhigi doono kaliya tartanada aad xaq uleedahay inaad codeyso halkaan [kingcounty.gov/elections/my-voter-information](http://kingcounty.gov/elections/my-voter-information).

## Ku codee warqadaada codbixinta

Isticmaal qalin midab kasta uu yahayba si aad ugu buuxiso wareega goobada ee ku xigo dookhaada ee tartan kasta. Haddii aad khalad sameyso, xariiq dulmari dookhaas oo dhan, oo ay kujirto wareega goobada, kadibna buuxi qeybta wareega goobada ee ku xigo dookhaada cusub. Inkasta oo aan kugu dhiirgelineyno inaad wada codeyso dhammaan warqadaada codbixinta, waxaad kaboodi kartaa codeynta tartankasta oo aad rabto waxaana kaliya aan tirin doonaa tartanada aad codeysay.

## Saxiix baqshadaada soocelinta

Si warqadaada codbixinta loo tiriyo, waa inaad saxiixdaa bayaanka caddeynta ku qoran baqshada soocelinta saxiixaasna waa inay islaahaadaan saxiixa kuqoran diiwaankaada diiwaangelinta codbixiyaha. Saxiixaada uma baahna in lagu qoro far isku dardarsan ama xitaa far la akhrin karo, kaliya waa inuu u ekaadaa midka faylka diiwaangelinta kujiro. Haddii saxiixaada uusan u ekaanin/ islaahaanin ama uu dhammaantii ka maqan yahay, waxaan kuu soo diri doonaa warqad oo kuugu soo direyno taleefan iyo iimeel haddii xogtaas ay faylka noogu jirto. Waxaan kaliya kaaga baahanahay inaad buuxisid oo aadna soo celiso foom fudud.

## Sooceli warqadaada codbixinta

Waxaad sidoo kale ku soocelin kartaa warqadaada codbixinta boosto, Vote Center (Xarunta Codbixinta) ama Student Engagement Hub (Xarunta Hawlgalinta Kaqaybgalka Ardayga), ama mid kamid ah in kabadan 70 sanduuq oo ammaan ah oo waraaqaha codbixinta lagu rido oo kuyaalo guud ahaan King County – wax istaambo/shaabad ah looma baahno.

Haddii aad doorato inaad boosto kusoo dirto waraaqahaada codbixinta, waxaan inaad sidaas sameyso kugula talineynaa ugu dambeyn Jimcaha kahorreeyo Maalinta Doorashada si aan u xaqiijino inaan si aan waqtigeeda kadaahin ku caalamadeyno/shaabadeyno boostada. Si loo tiriyo, warqadaada codbixinta waa in shaabada lagu calaamadeeyaa ugu dambeyn Maalinta Doorashada ama kujiraan sanduuqa waraaqaha codbixinta lagu rido ugu dambeyn 8 p.m. oo buuro ah.

## Raadraac/dabagal warqadaada codbixinta

Ka hubi raadraacaha waraaqaha codbixinta ee oonleenka ah si aad u xaqiijiso in warqadaada codbixinta ay gaartay oo ugu dambeyna la tiriyey. Raadraacaha waraaqaha codbixinta ee oonleenka ah sidoo kale waa habka ugu dhakhsiyaha badan ee aad ku arki karto haddii ay cillad kajirto saxiixa warqadaada codbixinta si markaa aad u xalliso oo codkaadana loo tiriyo. Ka raadraac/dabagal warqadaada codbixinta [kingcounty.gov/elections/ballot-tracker](http://kingcounty.gov/elections/ballot-tracker).